64. mana aha noloshan adduunyo Ciyaar iyo dheeldheel mooyee, Daarta aakhiraana meel nololeed ah hadday wax ogyihiin Dadku.

وَمَا هَٰذِهِ ٱلْحَيَوٰةُ ٱلدُّنْيَآ إِلَّا لَهْوٌ وَلَعِبٌ وَإِنَّ ٱلدَّارَ
ٱلْـَٔاخِرَةَ لَهِىَ ٱلْحَيَوَانُ لَوْ كَانُوا۟ يَعْلَمُونَ ﴿٦٤﴾

65. markay koraan Doonta waxay baryaan Eebe iyagoo u kaliyeeli Cibaadada, markuu u koriyo (oo geeyo) Barrigana (Dhulkana) markaasay u shariigyeelaan (wax la caabudaan).

فَإِذَا رَكِبُوا۟ فِى ٱلْفُلْكِ دَعَوُا۟ ٱللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ ٱلدِّينَ
فَلَمَّا نَجَّىٰهُمْ إِلَى ٱلْبَرِّ إِذَا هُمْ يُشْرِكُونَ ﴿٦٥﴾

66. si ay uga gaaloobaan waxaan siinay uguna raaxaystaan, wayse ogaan doonaan (Cidhibteeda).

لِيَكْفُرُوا۟ بِمَآ ءَاتَيْنَٰهُمْ وَلِيَتَمَتَّعُوا۟ فَسَوْفَ
يَعْلَمُونَ ﴿٦٦﴾

67. miyeyna arkeyn Gaaladii (Qureesheed) inaan yeeley (dajiney) Xaram aamin ah oo ladafayo Dadka dhinacyadooda ah, mabaadilbay rumeyn oo nicmada Eebay ka gaaloobi.

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّا جَعَلْنَا حَرَمًا ءَامِنًا وَيُتَخَطَّفُ
ٱلنَّاسُ مِنْ حَوْلِهِمْ أَفَبِٱلْبَٰطِلِ يُؤْمِنُونَ
وَبِنِعْمَةِ ٱللَّهِ يَكْفُرُونَ ﴿٦٧﴾

68. Cidna kama dulmi badna ruux ku been abuurtay Eebe korkiisa ama beeniyey xaqa markuu u yimid, miyeyna ahayn Jahannamo Hoyga Gaalada.

وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ ٱفْتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا أَوْ كَذَّبَ
بِٱلْحَقِّ لَمَّا جَآءَهُۥٓ أَلَيْسَ فِى جَهَنَّمَ مَثْوًى
لِّلْكَٰفِرِينَ ﴿٦٨﴾

69. kuwa ku jahaaday Dartanno waxaanu ku hanuunin Jidkanaga, Eebana wuxuu la jiraa kuwa wanaagga fala.

وَٱلَّذِينَ جَٰهَدُوا۟ فِينَا لَنَهْدِيَنَّهُمْ سُبُلَنَا
وَإِنَّ ٱللَّهَ لَمَعَ ٱلْمُحْسِنِينَ ﴿٦٩﴾

Nolosha adduunyo waa uun ciyaar oo kale'raaxadeeduna waa uun muddo yar aakharaase nolaldhab ahi jirtaa'waase inaan laysku halmaamin adduunka aakhirana lagajeedsanin, shaqada Xalaasha ahse waa waajib leyska abaalmarin.
Waxaa ka mid ah caadada dadka in markay dhib lakulmaan sida markay Badda ku safraan ama meelaha kalaba ay Eebe Isudulleeyaan'markuu dhibkii ka saarana ay kuwo badan Gaaloobaan kana jeedsadaan. Waxaa kale oo Eebe ku manaystay kuwii ree Makaad inuu dajiyey Xaram aamin ah oo Dadka gaararkooda ahna la waxyeeleeyo, mase haboona iney xumaan rumeeyaan xaqana ka gaaloobaan. Cid ka dulmi badanna ma jirto ruux ku been abuurtay Eebe ama xaqa beeniyey'Jahannamana waa xerada Gaalada. Kuwase u jahaada dar Eebe wuu hanuunin Eebe una gargaari. taasina waxay ku tusin ahmiyada Jahaadka iyo sharaftiisa. Al-Cankabuut (64-69).

## Suurat Ar-Ruum سُورَةُ الرُّومِ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

الٓمٓ ﴿١﴾

1. waxay ku tusin mucjisada Quraan-ka (sidii soo hormartay).

غُلِبَتِ ٱلرُّومُ ﴿٢﴾

2. waxaa lagaga adkaaday Ruum.

فِيٓ أَدْنَى ٱلْأَرْضِ وَهُم مِّنۢ بَعْدِ
غَلَبِهِمْ سَيَغْلِبُونَ ﴿٣﴾

3. Dhulkii dhawaa, intii laga adkaad-ay ka dibna way adkaan.

فِي بِضْعِ سِنِينَ ۗ لِلَّهِ ٱلْأَمْرُ مِن قَبْلُ
وَمِنۢ بَعْدُ ۚ وَيَوْمَئِذٍ يَفْرَحُ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿٤﴾

4. dhawr sano dhexdeed, amarkana Eebaa iska leh horey iyo diba, Maalin-taasayna ku farxi Mu'miniintu.

بِنَصْرِ ٱللَّهِ ۚ يَنصُرُ مَن يَشَآءُ ۖ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ
ٱلرَّحِيمُ ﴿٥﴾

5. Gargaarka Eebe, wuxuuna u gar-gaari cidduu doono, waana adkaade naxariista ah.

وَعْدَ ٱللَّهِ ۖ لَا يُخْلِفُ ٱللَّهُ وَعْدَهُۥ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ ٱلنَّاسِ
لَا يَعْلَمُونَ ﴿٦﴾

6. waa yabooha Eebe, mana baajiyo Eebe yaboohiisa, laakiin Dadka badan-kiisu ma oga.

يَعْلَمُونَ ظَٰهِرًا مِّنَ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَهُمْ عَنِ ٱلْءَاخِرَةِ
هُمْ غَٰفِلُونَ ﴿٧﴾

7. waxay yaqaanaan Dadku muu-qaalka nolosha adduunyo Aakhirose way halmaansanyihiin (ka jaahil yi-hiin).

أَوَلَمْ يَتَفَكَّرُوا۟ فِيٓ أَنفُسِهِم ۗ مَّا خَلَقَ ٱللَّهُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَٱلْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَآ إِلَّا بِٱلْحَقِّ وَأَجَلٍ مُّسَمًّى ۗ
وَإِنَّ كَثِيرًا مِّنَ ٱلنَّاسِ بِلِقَآئِ رَبِّهِمْ
لَكَٰفِرُونَ ﴿٨﴾

8. miyeyna ka fikirin naftooda Inuu-san Eebe Samaawaadka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya u abuurin waxaan xaq iyo muddo magacaaban ahayn, wax ba-dan oo dadka ka mid ahna waxay ka Gaaloobi la kulanka Eebahood.

Suuraddan waxay soo dagtay markay is laayeen ree Ruum oo ehelu Kitaab ahaa iyo ree Furus oo Majuusi (Diinlaawe) ahaa'markaasna laga adkaaday ree ruum, kadibna Gaaladii farxeen oo dheheen waxaanu ka adkaan Muslimiinta, laakiin sida Eebe sheegay Ruumbaa adkaatay muddo yar ka dib, si Mu'miniintu ugu faraxdo gargaarka Eebe'iyo cidduu wax u yabooho uusan ka baajineynin, Gaalase waxay awoodoo-dii isugu geeyeen nolosha adduun Aakhirana way ka jeed sadeen, mana fikirin inaan Eebe ciyaar u abuurin Khalqigiisa,
Calaa Binu Subayr wuxuu ka wariyey Aabihiis inuu yidhi: Waxaan arkay Faarisoo Ruum ka adkaatay iyo Ruumoo Faaris ka adkaatay, ka dibna waxaan arkay Muslimiintoo ka adkaatay Faaris iyo Ruumba dhammaanna waxay ahaayeen Dhawr iyo toban Sano dhexdeed. Ibnu Kathiir. Ar-Ruum (1-8).

9. miyeyna ku soconin Dhulka oy eegan siday ahaatay cidhibtii kuwii ka horreeyey (Gaaladii Makaad) waxay ahaayeen kuwo ka daran iyaga kana xoog badan, Dhulkana waybeerteen wayna Dhiseen Dhulka intay dhiseen wax ka badan. waxayna ula timid Rasuulladoodii Xujooyin,Eebana ma aha mid wax dulmiya, laakiin iyagaa naftooda dulmiyey.

أَوَلَمْ يَسِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ فَيَنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَـٰقِبَةُ
ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَانُوٓا۟ أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَأَثَارُوا۟
ٱلْأَرْضَ وَعَمَرُوهَآ أَكْثَرَ مِمَّا عَمَرُوهَا وَجَآءَتْهُمْ
رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَـٰتِ ۖ فَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيَظْلِمَهُمْ
وَلَـٰكِن كَانُوٓا۟ أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٩﴾

10. markaasay noqotay cidhibtii kuwii xumaanta falay, xumaan iyo (Jahannamo) beenintay aayadaha Eebe beeniyeen darteed, waxayna ahaayeen kuwo aayadaha ku jees jeesa.

ثُمَّ كَانَ عَـٰقِبَةَ ٱلَّذِينَ أَسَـٰٓـُٔوا۟ ٱلسُّوٓأَىٰٓ أَن كَذَّبُوا۟
بِـَٔايَـٰتِ ٱللَّهِ وَكَانُوا۟ بِهَا يَسْتَهْزِءُونَ ﴿١٠﴾

11. Eebaa billaabay (Abuurka) Khalqiga isagaana soo celin,xaggiisaana laydiin celin.

ٱللَّهُ يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ
ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿١١﴾

12. Maalintay kici Saacaddu (Qiyaamadu) way aamusi dambiilayaashu (ooy quusan).

وَيَوْمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ يُبْلِسُ ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿١٢﴾

13. ugumana sugnaanin kuway Eebe lawadajiyeen (Cibaadada) Shafeeco waxayna noqon kuwo diida Shurakadoodii.

وَلَمْ يَكُن لَّهُم مِّن شُرَكَآئِهِمْ شُفَعَـٰٓؤُا۟
وَكَانُوا۟ بِشُرَكَآئِهِمْ كَـٰفِرِينَ ﴿١٣﴾

14. Maalintay kici Saacadu waa maalin ay kala tagi Dadku.

وَيَوْمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ يَوْمَئِذٍ يَتَفَرَّقُونَ ﴿١٤﴾

15. kuwa rumeeyey (xaqa) oo camalfiicanfalay Beer Janno yaa lagu faraxgaliyaa.

فَأَمَّا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّـٰلِحَـٰتِ
فَهُمْ فِى رَوْضَةٍ يُحْبَرُونَ ﴿١٥﴾

16. kuwa Gaaloobayse oo beeniyey aayaadkanaga iyo lakulanka aakhiro kuwaas waxaa lagu kulmin Cadaabka.,

وَأَمَّا ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ وَكَذَّبُوا۟ بِـَٔايَـٰتِنَا وَلِقَآئِ ٱلْـَٔاخِرَةِ
فَأُو۟لَـٰٓئِكَ فِى ٱلْعَذَابِ مُحْضَرُونَ ﴿١٦﴾

Aayadahan wuxuu Eebe ku hanuunin in Dadku dhulka ku socdaan'si ay u arkaan Qudrada Eebe iyo awoodiisa'iyo inay arkaan raadkii ummadihii hore ee la abaalmariyey markay xaqii beeniyeen iyo in ciddii xumaan fasha Cidhibteedu noqon in xumaan lagu abaalmariyo. Tan kale waxay Dadku noqon maalintaas qiyaame Laba kooxood, xaq raacayaal Janno gali'iyo xaq diidayaal Naar u dheelman. Qataadana wuxuu yidhi: Wallee waa kala tag aan kulan ka dambayn. Ar-Ruum (9-16).

17. Eebaa nasahan (Ceeb ka fog) markaad galabaysanaysaan iyo markaad waabariisanaysaan.

فَسُبْحَـٰنَ ٱللَّهِ حِينَ تُمْسُونَ وَحِينَ تُصْبِحُونَ ﴿١٧﴾

18. mahadna isagaa ku leh Samooyinka iyo Dhulka dhexdooda iyo Habeenkii iyo Duhurkiiba.

وَلَهُ ٱلْحَمْدُ فِى ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ
وَعَشِيًّا وَحِينَ تُظْهِرُونَ ﴿١٨﴾

19. kana soobixiya wax nool wax dhintay wax dhintayna wax nool,nooleeyana Dhulka intuu dhintay ka dib, saasaana laydiin soo bixin.

يُخْرِجُ ٱلْحَىَّ مِنَ ٱلْمَيِّتِ وَيُخْرِجُ ٱلْمَيِّتَ مِنَ ٱلْحَىِّ
وَيُحْىِ ٱلْأَرْضَ بَعْدَ مَوْتِهَا ۚ وَكَذَٰلِكَ تُخْرَجُونَ ﴿١٩﴾

20. waxaana ka mid ah Calaamooyinkiisa inuu idinka abuuray Carro markaasaad noqoteen Dad dhaqdhaqaaqi (Faafi).

وَمِنْ ءَايَـٰتِهِۦٓ أَنْ خَلَقَكُم مِّن تُرَابٍ
ثُمَّ إِذَآ أَنتُم بَشَرٌ تَنتَشِرُونَ ﴿٢٠﴾

21. waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa inuu idiinka abuuray naftiina Haween si aad isugu xasishaan, yeelayna dhexdiina isjacayl iyo naxariis, taasina waxaa ugu sugan Calaamad qoomkii fikiri.

وَمِنْ ءَايَـٰتِهِۦٓ أَنْ خَلَقَ لَكُم مِّنْ أَنفُسِكُمْ أَزْوَٰجًا
لِّتَسْكُنُوٓا۟ إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُم مَّوَدَّةً وَرَحْمَةً ۚ
إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَـَٔايَـٰتٍ لِّقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٢١﴾

aayadahan waxay inagu hanuunin inaan Eebe u tasbiixsano xumaantana ka nasahno wakhti walba'illeen isagaana awood leh oo wax walba abuuraye'Dadkana soo bixin doonee, waxaana ka mid ah aayaadka Jiritaanka Eebe iyo Awoodiisa ku tusin inuu dadka Carro ka abuuray, Rag iyo Haweenna ka dhigay Si ay isuguursadaan oo isula nagaadaan iyaga oo naxariis iyo jacayl dhexyaallo.
Rasuulkuna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe kirkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Eebe wuxuu ka abuuray Aadam Dhulka oodhan wax ka mid ah, markaasuu noqday Bini aadamkii sida dhulka, waxaa ka mid ah mid cad, mid Cas, mid Madow iyo mid u dhaxeeya, iyo mid xun iyo mid fiican iyo mid fudud, iyo mid adag iyo mid udhaxeeya. Waxaa wariyey Axmed iyo kuwo kale. Ar-Ruum (17-21).

---

22. Waxaa ka mid ah Aayaadka ku tusin (Qudrada) Eebe samooyinka uu abuuray iyo Dhulka iyo kala duwanaanta Afkiina (Luuqada) iyo midabkiinaba, taasina calaamad yaa ugu sugan kuwa Cilmiga leh.

وَمِنْ ءَايَـٰتِهِۦ خَلْقُ ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَٱخْتِلَـٰفُ
أَلْسِنَتِكُمْ وَأَلْوَٰنِكُمْ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ
لَـَٔايَـٰتٍ لِّلْعَـٰلِمِينَ ﴿٢٢﴾

23. waxaa ka mid ah Aayadka ku tusin (Qudrada) Eebe Hurdadiina Habeenkii iyo Maalintii iyo doonidiina Fadliga Eebe, taasna calaamad yaa ugu sugan kuwa wax maqli.

وَمِنْ ءَايَـٰتِهِۦ مَنَامُكُم بِٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ وَٱبْتِغَآؤُكُم
مِّن فَضْلِهِۦٓ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَـَٔايَـٰتٍ
لِّقَوْمٍ يَسْمَعُونَ ﴿٢٣﴾

24. waxaa ka mid ah Aayaadka ku tusin (qudra) Eebe Hillaaca uu idin tusiyo, Cabsi iyo Doonid darteed, iyo Samada uu idiinka soo dajiyo Biyo, kuna nooleeyo Dhulka intuu dhintay ka dib, taasina Calaamado yaa ugu sugan kuwa wax kasi.

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦ يُرِيكُمُ ٱلْبَرْقَ خَوْفًا وَطَمَعًا
وَيُنَزِّلُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَيُحْيِۦ بِهِ ٱلْأَرْضَ
بَعْدَ مَوْتِهَآ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ
يَعْقِلُونَ ﴿٢٤﴾

25. waxaa ka mid ah Aayaadka ku tusin (qudrada) Eebe inay Samada iyo Dhulku ku taaganyihiin amarka Eebe, markuu Dhulka idiinka yeedhana (soobixinta) aad durba soo baxdaan.

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦٓ أَن تَقُومَ ٱلسَّمَآءُ وَٱلْأَرْضُ بِأَمْرِهِۦ ۚ
ثُمَّ إِذَا دَعَاكُمْ دَعْوَةً مِّنَ ٱلْأَرْضِ إِذَآ أَنتُمْ تَخْرُجُونَ ﴿٢٥﴾

Wali waxay ka warrami aayaadku awoodda Eebe iyo siduu u abuuray Cirka iyo Dhulka'iyo siduu u kala duway Hadalka iyo Midabka binii aadamka'iyo siduu ugu sahlay hurdada si loogu nasto, ka dibna Khayrka Eebe loo dalbo'waxyaalahaasna Calaamad yaa ugu sugan ciddii wax garan ama maqli, sidaas oo kale waa kan Eebe Dadka tusiyo Hillaaca Cirkana Roob ka keena Dhulkana ku nooleeya'amarkiisuuna Cirka iyo dhulka ku taaganyihiin, Dadkana ka soo bixin doona Dhulka Qiyaame darteed. Ar-Ruum (22-25).

---

26. Eebaa iska leh waxa Samooyinka iyo Dhulkaba ku sugan, isagayna u khushuucaan (u hogaansamaan).

وَلَهُۥ مَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۖ
كُلٌّ لَّهُۥ قَٰنِتُونَ ﴿٢٦﴾

27. Eebe waa kan billaabay abuurka Khalqiga, hadana soo celin wayna u fududahay arrintaasu, Eebaana sifo sare ku muta Samooyinka iyo Dhulka, waana adkaade falsan.

وَهُوَ ٱلَّذِى يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ وَهُوَ أَهْوَنُ
عَلَيْهِ ۚ وَلَهُ ٱلْمَثَلُ ٱلْأَعْلَىٰ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ
وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٢٧﴾

28. Eebe wuxuu idiin yeeley tusaale naftiina ah, waxaad hanataan miyey idinlawadaagaan wax laydinku arzuqay, ood si isku mid ah u maamulaysaan, ugana cabsanaysaan sidaad isaga cabsataan, saasuuna u caddayn aayaadka ciddii wax kasi.

ضَرَبَ لَكُم مَّثَلًا مِّنْ أَنفُسِكُمْ ۖ هَل لَّكُم
مِّن مَّا مَلَكَتْ أَيْمَٰنُكُم مِّن شُرَكَآءَ
فِى مَا رَزَقْنَٰكُمْ فَأَنتُمْ فِيهِ سَوَآءٌ تَخَافُونَهُمْ
كَخِيفَتِكُمْ أَنفُسَكُمْ ۚ كَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ
ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَعْقِلُونَ ﴿٢٨﴾

29. haseyeeshee waxay raaceen kuwii dulmilowga ahaa Hawadooda iyagoon

بَلِ ٱتَّبَعَ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓا۟ أَهْوَآءَهُم بِغَيْرِ عِلْمٍ ۖ

wax ogayn, yaa hanuunin kara ruux Eebe dhumid u qadaray, wax u gargaarana lahayn.

فَمَن يَهْدِي مَنْ أَضَلَّ ٱللَّهُ ۖ وَمَا لَهُم
مِّن نَّـٰصِرِينَ ﴿٢٩﴾

Wax walba awooda Eebe yey ku jirtaa, ama cir ha ku noolaado ama Dhule, wax walbana Eebaa abuuray usoona celin si fudud, amaan iyo sharaf sarana Eebaa mudan, awood iyo Xigmadna isagaa leh, wax maamulkiisa la wadaagana ma jiro, ruuxiise aqoon la'aan hawadiisa iska raaca oo dulmi fala yaa tusin oo u gargaari Eebe ka sokow. Abuu Hureera waxaa laga wariyey in Rasuulku Yidhi: (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe wuxuu yidhi: Waxaa i beeniyey ina Aadam umana haboona, wuuna i caayey umana haboona... Ar-Ruum (26-29).

---

30. ee Wajigaaga u jeedi Diinta adoo toosan (Diintu) waa abuuridda Eebe ee Dadka uu ku abuuray, wax badali kara abuurka Eebena ma jiro, saasina waa Diinta toosan laakiin dadka badidiis ma oga.

فَأَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا ۚ فِطْرَتَ ٱللَّهِ
ٱلَّتِى فَطَرَ ٱلنَّاسَ عَلَيْهَا ۚ لَا تَبْدِيلَ لِخَلْقِ ٱللَّهِ ۚ
ذَٰلِكَ ٱلدِّينُ ٱلْقَيِّمُ وَلَـٰكِنَّ أَكْثَرَ
ٱلنَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٣٠﴾

31. idinkoo Eebe u noqon, kana yaaba, Salaadana ooga, Galadana ha ka mid noqonina.

۞ مُنِيبِينَ إِلَيْهِ وَٱتَّقُوهُ وَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ
وَلَا تَكُونُوا۟ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿٣١﴾

32. ee Diintooda ku kala tagay noqdayna kooxo,Xisbi walba uu ku farxi waxa agtiisa ah.

مِنَ ٱلَّذِينَ فَرَّقُوا۟ دِينَهُمْ وَكَانُوا۟ شِيَعًا ۖ
كُلُّ حِزْبٍۭ بِمَا لَدَيْهِمْ فَرِحُونَ ﴿٣٢﴾

33. hadduu Dadka taabto dhib waxay baryaan Eebahood iyagoo u noqon, markuuse dhadhansiiyo naxariis qayb iyaga ka mid ah waxay wax lawadaajiyaan Eebahood.

وَإِذَا مَسَّ ٱلنَّاسَ ضُرٌّ دَعَوْا۟ رَبَّهُم مُّنِيبِينَ إِلَيْهِ
ثُمَّ إِذَآ أَذَاقَهُم مِّنْهُ رَحْمَةً إِذَا فَرِيقٌ مِّنْهُم
بِرَبِّهِمْ يُشْرِكُونَ ﴿٣٣﴾

34. si ay uga gaaloobaan waxaan siinney, iska raaxaysta, waadna ogaandoontaan Cidhibta raaxadaasi.

لِيَكْفُرُوا۟ بِمَآ ءَاتَيْنَـٰهُمْ ۚ فَتَمَتَّعُوا۟ فَسَوْفَ
تَعْلَمُونَ ﴿٣٤﴾

35. mise waxaan ku soo dejiney xujo, oo ku hadli waxay Eebe la wadaajin.

أَمْ أَنزَلْنَا عَلَيْهِمْ سُلْطَـٰنًا فَهُوَ يَتَكَلَّمُ
بِمَا كَانُوا۟ بِهِۦ يُشْرِكُونَ ﴿٣٥﴾

Diinta Islaamku waa Diin xaq ah, waana Diin waafaqsan abuuridda Dadka iyo waxa wanaag ah ee ay dooni'wax ka hor imaan karaana ama badali karaana ma jiro' waxayna fari Eebe adeecid, sida Salaadda, Zakada iyo isku duubni iyo midnimo, iyo in Diintoo lagu kalatago ay gaalimo tahay, had iyo jeerna waa in Eebe la xusuusnaado, dhib iyo barwaaqaba si aan nicmadiisa looga gaaloobin xujo la'aan, ruuxii gaalimo ku raaxaystana wuxuu la kulmi Ciqaab xun. Ar-Ruum (30-35).

36. haddaan dhadhansiino dadka naxariis way ku farxi «kibraan» hadduu dhibku dhacana waxay hor marsadeen darteed way quustaan.

وَإِذَآ أَذَقْنَا ٱلنَّاسَ رَحْمَةً فَرِحُوا۟ بِهَا ۖ وَإِن تُصِبْهُمْ
سَيِّئَةٌۢ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ إِذَا هُمْ يَقْنَطُونَ ﴿٣٦﴾

37. miyeyna arkayn in Eebe u waasiciyo rizqiga cidduudoono, kuna cidhiidhyo (Cidduu doono) arrintaasna Calaamooyinbaa ugu sugan kuwa rumeyn (Xaqa).

أَوَلَمْ يَرَوْا۟ أَنَّ ٱللَّهَ يَبْسُطُ ٱلرِّزْقَ لِمَن يَشَآءُ
وَيَقْدِرُ ۚ إِنَّ فِى ذَٰلِكَ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ ﴿٣٧﴾

38. ee Qaraabada sii xaqeeda iyo Miskiinka iyo Musaafurka, saasaa u khayroon kuwa dooni Wajiga Eebe, (u dhawaanshahiisa) kuwaasina waa kuwa liibaanay.

فَـَٔاتِ ذَا ٱلْقُرْبَىٰ حَقَّهُۥ وَٱلْمِسْكِينَ وَٱبْنَ ٱلسَّبِيلِ ۚ
ذَٰلِكَ خَيْرٌ لِّلَّذِينَ يُرِيدُونَ وَجْهَ ٱللَّهِ ۖ وَأُو۟لَٰٓئِكَ
هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿٣٨﴾

39. waxaad bixisaan oo Ribo ah si aad uga badsataan xoolaha dadka ma badnaado Eebe agtiisa, wixiise aad bixisaan oo Zako (xalaal ah) idinkoo ku dooni Wajiga Eebe kuwaas waa loo laablaabi.

وَمَآ ءَاتَيْتُم مِّن رِّبًا لِّيَرْبُوَا۟ فِىٓ أَمْوَٰلِ ٱلنَّاسِ فَلَا يَرْبُوا۟
عِندَ ٱللَّهِ ۖ وَمَآ ءَاتَيْتُم مِّن زَكَوٰةٍ تُرِيدُونَ وَجْهَ ٱللَّهِ
فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُضْعِفُونَ ﴿٣٩﴾

Sida mararbadan soo martay waa in Eebe had iyo jeer lagu xidhnaado lana xuso dhib iyo barwaaqaba, aan lana kibrin lana Quusan illeen saasi waa xigmad Eebe, Qaraabada, Masaakiinta, Musaafuriinta iyo Dadka goomoon oodhanna loogu samo falo’Eebe dartiis Si loo Liibaano, Ribada’Damaca xoolaha Dadka iyo xoola jacaylka darana layska jiro, lana sadaqaysto xoolo xalaal ah’si Eebe agtiisa loogu Liibaano. Ar-Ruum (36-39).

---

40. Eebe waa kan idin abuuray Hadana idin arzaaqay hadana idin Dili, hadana idin soo noolayn, majiraa shurakadiina mid fali sidaas wax ka mid ah,Eebaa ka nasahana kana sareeya waxay la wadaajin.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَكُمْ ثُمَّ رَزَقَكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ
ثُمَّ يُحْيِيكُمْ ۖ هَلْ مِن شُرَكَآئِكُم مَّن يَفْعَلُ
مِن ذَٰلِكُم مِّن شَىْءٍ ۚ سُبْحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ
عَمَّا يُشْرِكُونَ ﴿٤٠﴾

41. xumaanbaa ka daahirtay Barri iyo Badba, waxay kasbatay Gacmo Dad dardiis,si Eebe u dhadhansiiyo waxay camalfaleen qaarkiis, inay noqdaan.

ظَهَرَ ٱلْفَسَادُ فِى ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ بِمَا كَسَبَتْ
أَيْدِى ٱلنَّاسِ لِيُذِيقَهُم بَعْضَ ٱلَّذِى عَمِلُوا۟
لَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ ﴿٤١﴾

42. waxaad dhahdaa ku socda Dhulka fiiriyana siday noqotay cidhibtii kuwii hore, wuxuu ahaa badankoodu Mushrikiin.

قُلْ سِيرُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ فَٱنظُرُوا۟ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ
ٱلَّذِينَ مِن قَبْلُ ۚ كَانَ أَكْثَرُهُم مُّشْرِكِينَ ﴿٤٢﴾

43. ee Wajigaaga Diinta toosani (Islaamka) u jeedi, maalin aan la celin karin ka hor, Eebe xaggiisana ka iman, Maalintaas Dadku way kala tagi.

فَأَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ ٱلْقَيِّمِ مِن قَبْلِ أَن يَأْتِيَ
يَوْمٌ لَّا مَرَدَّ لَهُۥ مِنَ ٱللَّهِ ۖ يَوْمَئِذٍ يَصَّدَّعُونَ ﴿٤٣﴾

44. ruuxii Gaalooba isagay (dhibi) Gaalimadiisu, ruuxii camal wanaagsan fala Naftiisa yuu u goglay.

مَن كَفَرَ فَعَلَيْهِ كُفْرُهُۥ ۖ وَمَنْ عَمِلَ صَٰلِحًا
فَلِأَنفُسِهِمْ يَمْهَدُونَ ﴿٤٤﴾

45. si Eebe u abaalmariyo kuwa rumeeyey xaqa oo camal wanaagsan falay fadligiisa, Eebana ma jecla Gaalo.

لِيَجْزِيَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
مِن فَضْلِهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ لَا يُحِبُّ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٤٥﴾

Eebe isagaa wax abuuray, oo arzuqa, Dili, soona noolayn, Xumaanna waa ka fogyahay'Dambiga iyo Macaasidu waxay sababaan xumaanta dhulka iyo fasaadkiisa'dadkuna way dhadhamin xumaanta Gacmahoodu kasbadeen, waase in la fikiro dhulkana la maro, Diinta toosan ee Islaamka ee xaqa ahna lagu toosnaado, Qiyaame iyo xisaab iyo kalatagid ka hor, si xumaanlowgana xumaantiisa looga abaalmariyo, wanaaglowgana samihiisa laga abaalmariyo'Eebana ma jeclo Gaal iyo Xuma fale, wuxuuse jecelyahay Mu'miniinta xaqa raacda, Waxaa sugnaaday in dadka, dhulka geedaha iyo Xooluhuba ka istareexaan Geerida kuwa xun xun. Ar-Ruum (40-45).

---

46. Calaamaadka Eebe ku tusin waxaa ka mid ah inuu dabaylaha diro iyagoo ku bishaarayn (Roob) iyo in Eebe idin dhadhansiiyo naxariistiisa iyo in doontu ku socoto amarkiisa iyo inaad dalabtaan fadligiisa, markaas aad Eebe ku mahdisaan.

وَمِنْ ءَايَٰتِهِۦٓ أَن يُرْسِلَ ٱلرِّيَاحَ مُبَشِّرَٰتٍ وَلِيُذِيقَكُم
مِّن رَّحْمَتِهِۦ وَلِتَجْرِيَ ٱلْفُلْكُ بِأَمْرِهِۦ
وَلِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٤٦﴾

47. waxaan dhab ahaan ugu diray hortaa Rasuulo qoomkoodii, waxayna ulayimaadeen xujooyin waana ka aarsanay kuwii dambi Falay, waxaana korkanaga ah u gargaarka Mu'miniinta.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ رُسُلًا إِلَىٰ قَوْمِهِمْ فَجَآءُوهُم
بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَٱنتَقَمْنَا مِنَ ٱلَّذِينَ أَجْرَمُوا۟ ۖ وَكَانَ حَقًّا
عَلَيْنَا نَصْرُ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٤٧﴾

48. Eebe waa kan diray Dabaylaha oo markaas kicisa Daruuro kuna fidiya Samada, siduu doono kana yeela Goosimo aad aragtid Roobka oo ka soobixi dhexdeeda, markaasuu Eebe Roobka siiyaa Ciduu doono oo adoomadiisa ka mid ahna markaasay bishaaraystaan.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى يُرْسِلُ ٱلرِّيَٰحَ فَتُثِيرُ سَحَابًا فَيَبْسُطُهُۥ
فِى ٱلسَّمَآءِ كَيْفَ يَشَآءُ وَيَجْعَلُهُۥ كِسَفًا فَتَرَى
ٱلْوَدْقَ يَخْرُجُ مِنْ خِلَٰلِهِۦ ۖ فَإِذَآ أَصَابَ بِهِۦ مَن يَشَآءُ
مِنْ عِبَادِهِۦٓ إِذَا هُمْ يَسْتَبْشِرُونَ ﴿٤٨﴾

49. waxayna ahaayeen soo dajinta Roobka ka hor kuwo Quusan.

وَإِن كَانُوا۟ مِن قَبْلِ أَن يُنَزَّلَ عَلَيْهِم مِّن قَبْلِهِۦ
لَمُبْلِسِينَ ﴿٤٩﴾

50. ee day naxariista Eebe raadkeeda sida Eebe, ugu nooleeyo dhulka intuu dhintay ka dib Eebaha wuxuu nooleeyaa wixii dhintay wax walbana waa arkaa.

فَانظُرْ إِلَىٰٓ ءَاثَٰرِ رَحْمَتِ ٱللَّهِ كَيْفَ يُحْىِ ٱلْأَرْضَ
بَعْدَ مَوْتِهَآ ۚ إِنَّ ذَٰلِكَ لَمُحْىِ ٱلْمَوْتَىٰ ۖ
وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ﴿٥٠﴾

Roobka iyo naxariista Eebaa keena, si uu ugu nooleeyo addoomadiisa iyo Dhulka ay ku noolyihiin korkiisa'waana kan rasuullo badan u diray Umadihii hore iyagoo xaq wata kuwii beeniyeyna looga aarsaday, Eebe waa u gargaare Mu‘miniinta Xaqa ah, keenida Roobka lagu farxina waxay ku tusin awoodda Eebe iyo inuu wax walba karo. Ar-Ruum (46-50).

---

51. haddaan ku diro Dabaylo (daran) Beertooda ay arkaan iyadoo doorsoon, waxay markaas ka dib noqdaan kuwo Gaalooba.

وَلَئِنْ أَرْسَلْنَا رِيحًا فَرَأَوْهُ مُصْفَرًّا لَّظَلُّوا۟ مِنۢ بَعْدِهِۦ
يَكْفُرُونَ ﴿٥١﴾

52. adigu wax ma maqashiin kartid kuwo dhintay, Mid dhagala' oo jeedsadayna wax ma maqashiin kartid.

فَإِنَّكَ لَا تُسْمِعُ ٱلْمَوْتَىٰ وَلَا تُسْمِعُ ٱلصُّمَّ ٱلدُّعَآءَ
إِذَا وَلَّوْا۟ مُدْبِرِينَ ﴿٥٢﴾

53. ruux Indha la‘na baadi kama hanuunin kartid, ma maqashiinkartid (xaqa) ruuxaan rumeynin Aayaadkanaga oo muslimiin ahayn.

وَمَآ أَنتَ بِهَٰدِ ٱلْعُمْىِ عَن ضَلَٰلَتِهِمْ ۖ إِن تُسْمِعُ
إِلَّا مَن يُؤْمِنُ بِـَٔايَٰتِنَا فَهُم مُّسْلِمُونَ ﴿٥٣﴾

54. Eebe waa kan idin ka abuuray Tabaryare, hadana idinka yeelay Tabaryare ka dib xoog, hadana xoog dabadi idinka yeelay Tabaryari iyo Gabow, wuxuu doono yuu abuuraa, waana wax walba oge, wax walba kare (oo uu doono).

۞ ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَكُم مِّن ضَعْفٍ ثُمَّ جَعَلَ مِنۢ بَعْدِ
ضَعْفٍ قُوَّةً ثُمَّ جَعَلَ مِنۢ بَعْدِ قُوَّةٍ ضَعْفًا وَشَيْبَةً ۚ
يَخْلُقُ مَا يَشَآءُ ۖ وَهُوَ ٱلْعَلِيمُ ٱلْقَدِيرُ ﴿٥٤﴾

Dabayshu waa qayb ka mid ah khalqiga Eebe, waxna Eebe waa ku anfacaa, marmarna waxay dhibtaa si loogu edbiyo kuwa leexday, inse la gaaloobo ma aha hadday dhibaato keento, xaqdiidana Eebe uunbaa hanuuninkara ama musliminkara, illeen Eebaa dadka mariya marxalado kala duwan, sida tabaryarida'xoogga Duqnimada iyo Geeridaba, maxaayeeley ogaansho iyo awoodba isagay ku dhamaadaan. Ar-Ruum (51-54).

---

55. maalinta Qiyaamadu kacdo waxay ku dhaartaan dambiilayaashu inayan nagaanin Saacad mooyee, saasaana (xaqa) looga leexiyey.

وَيَوْمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ يُقْسِمُ ٱلْمُجْرِمُونَ مَا لَبِثُوا۟
غَيْرَ سَاعَةٍ ۚ كَذَٰلِكَ كَانُوا۟ يُؤْفَكُونَ ﴿٥٥﴾

56. kuwii waxay dheheen cilmiga iyo Iimaanka la siiyey waad ku nagaateen Qadarka Eebe tan iyo maalinta soobixinta, kanna waa maalintii soobixinta, laakiin waxaad ahaydeen kuwo aan ogayn.

وقال الذين أوتوا العلم والإيمن لقد لبثتم في كتب
الله إلى يوم البعث فهذا يوم البعث
ولكنكم كنتم لا تعلمون ﴿٥٦﴾

57. Maanta (Qiyaamada) ma anfacdo kuwii dulmiga falay cudur daar iyo toobad keen.

فيومئذ لا ينفع الذين ظلموا معذرتهم
ولا هم يستعتبون ﴿٥٧﴾

58. dhab ahaanbaan ugu caddaynay Dadka Quraankan dhexdiisa tusaale kasta, haddaadna ula timaado aayad waxay dhihi kuwii Gaaloobay waxaan baadhil (xumaan) ahayn kuma sugnidin.

ولقد ضربنا للناس في هذا القرءان من كل مثل
ولئن جئتهم بءاية ليقولن الذين كفروا
إن أنتم إلا مبطلون ﴿٥٨﴾

59. saasaa Eebe u daboolaa Quluubta kuwan wax ogayn (wax anfaca).

كذلك يطبع الله على قلوب الذين
لا يعلمون ﴿٥٩﴾

60. ee samir yabooha Eebe waa xaqe, yeyna ku fududayn kuwaan yaqiinsanayn (Xaqa).

فاصبر إن وعد الله حق ولا يستخفنك
الذين لا يوقنون ﴿٦٠﴾

Saacadda Qiyaame waa arrin daran oo culus’Gaalada dambiilayaasha ahna waqtigu wuu ka qasmi’waxayna ku dhaaran dhibaatada darteed inayan adduunkii ku nagaanin Saacad wax ka badan’taasna waxay ku tusin inaan nicmada adduun iyo noloshiisa wax u tarayn ruuxii dhuma, Mu‘miniintase waa u xisaabanyahay waqtigu’calaacalna wax mataro Qiyaame, illeen quraankaa Eebe wax walba ku caddeeyaye’madax adayg iyo xaqdiidna waa dabeecadda Gaalada, ee xaqa ku samra una adkaysta. Gaalana yeyna idin dhumin. Ar-Ruum (55-60).

## Suurat Luqmaan

## سورة لقمان

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بسم الله الرحمن الرحيم

1. waxay ku tusin mucjisada Quraanka (sida soo hormartay).

الم ﴿١﴾

2. tan waa aayaadka Kitaabka (Quraanka) xigmada leh.

تلك ءايت الكتب الحكيم ﴿٢﴾